Early Childhood Education
COLUMBUS CITY SCHOOLS

**Division of Early Childhood Education**
Central Enrollment Center
430 Cleveland Avenue
Columbus, OH 43215
Ph. 614.365.5822
Fax 614.365.5163
www.ccsoh.us/earlychildhoodeducation

*Mission: Each student is highly educated, prepared for leadership and service, and empowered for success as a citizen in a global community.*

## Waxbarashada Heerka Carruurnimada Hore
## Tilmaamaha Codsiga Kaalmada Daryeelka Ilmaha

Qoyska Qaaliga ah ee Dugsiyada Magaalada Columbus ee Dugsiga Barbaarinta (Pre-Kindergarten-ka):

Barnaamijka Dugsiga Xanaanada ka hor ee (preschool) qasabna kuma aha wakhtigan Gobolka Ohio. Si kastaba ha ahaatee, Dugsiyada Magaalada Columbus waxaa ka go'an inay bixiyaan waayo-aragnimo heer sare ah ee ka horeeya-Dugsiga Barbaarinta (Pre-Kindergarten-ka).

Si aan u sii wadno bixinta fursadan **waxbaridda-laga dhaafey (tuition-waived)** carruurta ku nool gudaha xuduudaha imaanshaha CCS, waxaa lagama maarmaan ah inaad dhamaystirto codsiga Kaalmada Daryeelka Ilmaha.

Waad ku mahadsan tahay ka hor dhamaystirka codsiga Kaalmada Daryeelka Ilmaha. Waxaan rajaynaynaa inaan kaala kaashano waxbaridda ardaygaaga.

Tilmaamaha loogu talagalay dhamaystirka codsiga Kaalmada Daryeelka Ilmaha:

### *** Codsigu wuxuu ka bilaabmayaa bogga 5-aad***

- **Talaabada 1-aad:** Calaamadee sanduuqa Kaalmada daryeelka ilmaha.
- **Talaabada 2-aad:** Qor magaca iyo xogta waalidka/ilaaliyaha sharciga ah.
- **Talaabada 3-aad:** Qor xogta xiriirka waalidka/ilaaliyaha sharciga ah.

**U-gudub Talaabada 7-aad**

- **Talaabada 7-aad:** Qor liiska qof kasta oo kula nool oo buuxi dhammaan meelaha bannaan.
- **Talaabada 8-aad:** Sheeg haddii xubnaha qoysku ay da'doodu tahay 60 jir ama ka weyn.
- **Talaabada 9-aad:** Dhameystir qeybta dhaqaalaha qoyska adiga oo calaamadeynaya sanduuqa haddii aad heshay ama aad filayso in aad hesho dhaqaale ku soo gala bishan. Fadlan sidoo kale qor liiska isha (ilaha) dhaqaale ee soo gala **labada** waalid/ilaaliyeye ee sharciga ah ee ku nool guriga.

The Columbus City School District does not discriminate based upon sex, race, color, national origin, religion, age, disability, sexual orientation, gender identity/expression, ancestry, familial status or military status with regard to admission, access, treatment or employment. This policy is applicable in all district programs and activities.

Early Childhood Education
COLUMBUS CITY SCHOOLS

**Division of Early Childhood Education**

Central Enrollment Center
430 Cleveland Avenue
Columbus, OH 43215
Ph. 614.365.5822
Fax 614.365.5163
www.ccsoh.us/earlychildhoodeducation

*Mission: Each student is highly educated, prepared for leadership and service, and empowered for success as a citizen in a global community.*

* Dukumiintiga xaqiijinta dhaqaalaha kusoo gala ayaa taageeri doona waxa aad ku qortay Talaabada 9-aad. Waxaa laga yaabaa in lagula soo xiriiro mar dambe si aad u keento dukumiintiga dhaqaalaha ku soo gala ee dheeriga ah.

**Ku sii soco bogga xiga →**

Tilmaamaha Codsiga Kaalmada Daryeelka Ilmaha (ku sii soco):

- **Talaabada 10-aad:** Dhameystir qeybta kharashka qoyska oo hubi dhammaan kuwa khuseeya.
- **Talaabada 11-aad:** Dhameystir qeybta hawlaha u-qalmitaanka ee xubnaha qoyska.
- **Talaabada 12-aad:** U-dhameystir ilmahaaga (carruurtaada) gelaysa barnaamijka Dugsiga Barbaarinta (Pre-K).
  Waxaad ka tagi kartaa Magaca Bixiyaha & Ciwaanka oo banaan
- **Talaabada 13-aad:** U-dhameystir ilmahaaga (carruurtaada) ka diiwaan-gashan dugsiga barbaarinta (kindergarten-ka) ama fasalka ka sarreeya.
- **Talaabada 14-aad:** Fadlan saxiix oo taariikhda ku qor dhamaadka codsiga.

*** Codsiyada aan la saxiixin oo aan taariikhda lagu qorin lama ogalaan doono. ***

The Columbus City School District does not discriminate based upon sex, race, color, national origin, religion, age, disability, sexual orientation, gender identity/expression, ancestry, familial status or military status with regard to admission, access, treatment or employment. This policy is applicable in all district programs and activities.